Oslo

Waaxda qoyska- iyo carruurta



Sawir: Eckhardt, Diop/Bon Appetit/NTB

# Guri ay carruur ku koraan oo ku yaalla degaanka Oslo

Waxaan u baahannahay guryo fiican oo ammaan ah oo ay ku koraan carruur aan gurigooda ku noolaan karin

Ma laga yaabaa inay gurigaaga ku noolaan karaan?

**Waa maxay guri ay carruur ku koraan?**
Guri ay carruur ku koraan waa guri barayfat ah oo lagu daryeelo carruur aan ku noolaan karin gurigi waalidkood. Waxay sababtu noqon kartaa gacanqaad, isticmaalka mukhaaddaraadka ama nooc kale oo daryeel-xumo ah, jirro ama geeri ku timaadda qofkii daryeelaha ahaa. Waxay carruurtani u baahan yihiin guryo ammaan ah oo xasilloon oo ay ku noolaadaan noloshooda muddo gaaban ama dheer.
Guryaha ay carruurtu ku koraan qaar baa carruurta degdeg u qaabbila oo haya muddo xaddidan (guryaha heeganka). Qaar kalena waxay koriyaan carruurta baahiyaha gaarka ah leh, ayagoo wadashaqayn hoose la yeesha shaqaalahayaga khibradda leh (guryaha ilmaha koriya ee takhasuska leh). Labadaas nooc ee guryaha carruurtu ku koraan ahba, qof weyn ayaa si buuxda loogu shaqaaleeyaa oo lagu mushaaraa. Buugyarahani wuxuu ka hadlayaa guryaha caadiga ah ee carruurta lagu koriyo, halkaas oo qofku shaqo caadi ah haysan karo asagoo ilmaha korinaya.



Sawir: Jonas Ekströmer / TT / NTB

**Yaa noqon kara guri uu ilmo ku koro?**
Waxaan doonaynaa guryo ay ilmo ku koraan oo kala duwan. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in qiimayn lagu sameeyo, doobabka iyo lammaanaha labadaba, ayadoon loo eegayn dhanka ay u janjeeraan xagga galmada, jinsigooda iyo diintooda toona. Waxaa ugu muhiimsan awoodda uu qofku u leeyahay inuu ilmaha siiyo daryeel wanaagsan oo ammaan ah.

Shuruudo
- aan denbi gelin
- caafimaadka guud oo wanaaagsan
- dhaqaale hagaagsan iyo xaalad nololeed oo deggan
- boos hal ilmo oo dheeraad ah

Guryo ay ilmo ku koraan ayaan ka raadinaynaa Oslo iyo qiyaastii wixii agagaarkeeda ah ee 2 saac u jira.

**Nidaamka**
Haddii aad doonayso inay gurigaaga ilmo ku koraan, waxaan samaynaa qiimayn hordhac ah oo aan dadka gurigooda ku booqanno oo aan waraysanno. Waa inaad qaadataa tababbar khasab ah ka hor intaan lagu aqbalin oo aan hay'adda adeegga daryeelka carruurta ee xaafadda uu ilmuhu ku nool yahay aysan kaa dhigan guri ay ilmo ku koraan.

**Qoyska iyo dadka dhow**
Waxaa loo baahan yahay inay xaafaddu marka hore guri ka raadiso ilmaha qoyskiisa iyo dadka u dhow. La xiriir hay'adda adeegga daryeelka carruurta ee xaafadda ilmuhu ku nool yahay haddii aad aamminsan tahay inaad korin karto ilmo aad taqaanno oo ay hay'adda daryeelku u raadinayo guri uu ku koro.

**Taageero iyo hagis**
Markaad degmada Oslo u tahay guri ay ilmo ku koraan, waxaa kula soconaya hay'adda daryeelka carruurta ee xaafadda. Waaxda qoyska- iyo carruurta ayaa bixisa koorsooyin iyo hagis, kuwaas oo gooni-gooni iyo koox ahaan ba loo baxsho.



**Magdhawga dhaqaalaha**
Waalidka ilmo koriya waxaa la siiyaa caawin dhaqaale oo aasaasi ah (grunnstøtte), kharashka ka baxana waa loo celiyaa/magaa. Waad shaqayn kartaa adigoo ilmaha korinaya, laakiin sida caadiga ah waxaa dhacda inuu labada waalid midkood shaqada fasax ka qaato muddada u horreysa ayadoo loo magi doono dakhligii shaqada ee uu lumiyay.

**Shirarka warbixinta**
Waxaan qabannaa shirar warbixin lagu dhiibo, kuwaas oo isugu jira dhigitaal iyo kuwo la imaanayo looguna tala galay qofka doonaya inuu wax badan ka ogaado ahaanshaha guri ay ilmo ku koraan.

Wakhtiyada shirarka waxaad ka helaysaa **fosterhjem.no/oslo.**



Wixii macluumaad dheeraada
- Ka fiirso filmaanta aanu halkan soo dhignay

Barne- og familieetaten / Waaxda qoyska- iyo carruurta
Qaybta hagista guryaha ilmaha lagu koriyo, tababbar iyo taageero

Fridtjof Nansens plass 3, 5.etg
0160 Oslo
Iimayl: fosterhjem@bfe.oslo.kommune.no
Telefoon: 457 26 422

fosterhjem.no/oslo